# Hadda Maadaama Aad tahay Muhaajir Haysta Martabada U: Kuwani waa Digniino, Xaquuq iyo Waajibaad ku Saaran

Now that you are a U Nonimmigrant: Warnings, Rights and Responsibilities

## Ciddee ayey Warqadan xogta aruursan ahi caawin kartaa?

Warqadan xogta aruursan ah waxay ku socotaa dadka jaa haysta martabada U. Hadii aad tahay dhibane dambi laga galay aadna jaa codsatay martabada U aadna rabo inaad wax kale ka ogaato codsiga, eeg warqadayda xogta aruursan ee *Dhibayaasha Dambiyada iyo "Fiisaha U"*. Hadii uu tacadi kugu hayo qof ka tirsan qoyskaaaga sidoo kale eeg, Sharciyada *Sharci siinta Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah Dhibku ku soo Gaaro*.

**Ogow:** Ansaxinta fiisaha U gu waa ay ka duwan tahay siinta falka dib u dhigida ku salaysan fiisaha U. Siinta falka dib u dhigida badanaa waa talaabada koowaad **laakiin** la mid ma aha helida martabada U ee muhaajirka. Falka dib u dhigida ah waxaa la bixiyaa kolka ay laanta socdaalku ay eegto codsigaaga fiisaha U ayna u malaynayso inaad xaq u leedahay laakiin aysan jirin wax fiisaha U da ah oo la heli karo markiiba. Waxa aad u baahan tahay inaad sugto inta aad ka helayso anxasin kama dambaysta ah ee fiisaha U ka hor inta akhbaarta ku qoran warqadan xoga aruursan ahi ay adiga kaa quseeynayso.

## Codsigaygii Martabada U ee Muhaajirka waa la ansaxiyey. Ka dib maxaa dhici?

- **Hadii aad ku nooshahay Maraykanka (U. S.) kolka ay hay'ada USCIS ay ansaxiso codsigaaga,** martabadaada U ee muhaajirku waxa ay bilaabmi kolka ay hay'ada USCIS ay ansaxiso codsiga.

- **Hadii AADAN ku noolayn Maraykanka (U. S.) kolka ay hay'ada USCIS ay ansaxiso codsigaaga**, waa khasab inaad codsato fiiso aadna u tagto waraysi Safaarada ama Qunsiliyada Mareykanka (U.S.). Waxaa jira talaabooyin aad u baahan tahay inaad qaado, laakiin, safaarad ama qunsiliyad walbaa waxa ay leedahaya qaab iyada u gaar ah oo ay wax u sameyso. Hadii aad doonayso akhaar kale oo ku saabsan talaabooyinka, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka yaqaan.

  – Hadii Safaarada ama Qunsiliyada Mareykanka (U.S.), ay ansaxiso kiiskaaga waxa ay ku dhufan fiisaha U bog ka mid boggaga dal-ku-galkaaga (passport).



- Kolka aad soo gaarto Mareykanka (U.S.), tus dal-ku-galkaaga (passport), iyo fiisaha mas'uuliyiinta laanta socdaalka ee badanaa xaduudka ama garoonada diyaaradaha jooga.

- Hadii ay mas'uuliyiinta laanta socdaalku kuu ogolaadaan inaad gasho Mareykanka (U.S.), kolkaa waxa ay ku siin martabada U ee muhaajiraka. Waxaa laguugu dhufan shaabada ogolaanta dal-ku-galkaaga kolka aad soo gasho wadanka. Shaabadan Ogolaanshaha ahi waxa ay cadeynaysaa waqtiga aad oo gashay wadanka, martabadaada kolka aad soo galaysay iyo waqtiga ay martabadaadu ay dhacayso.

Kolka aad ka soo baxdo garoonka diyaaradaha, waa khasab inaad gasho shabakada www.cbp.gov/I94 si aad uga daabacato kaarkaaga la yiraa I-94. Waagii hore, mas'uuliyiinta laanta socdaalku waxa ay gelin jireen kaarka I-94 ka dal-ku-galkaaga (passport) inta aad gegida diyaaradaha joogto. Laakiin hada taa ma ay sameeyaan. Kaarka I-94 ku waa dukumiinti muhiim ah oo cadeeya waqtiga aad wadanka soo gashay, martabadaada soo gelida wadanka iyo waqtiga martabadaadu ay dhacayso. Daabacashada kaarkaaga I-94 ku waa arrin muhiim ah. Ha ka boodin talaabadaa. La tasho qareen laanta socdaalka qaabilsan hadii aad wax su'aalo ah qabto.

Hadii aad ka qaadatay fiisahaaga U dibada wadanka aadana marna waligaa soo gelin Mareykanka (U.S.) kolkaa marna uma aadan helin martabada U ee muhaajirka si sharci ah.

## Cidee madaxa ah? Ciddee se ku tiirsan?

Qofka ku qoran kiiska Muhaajirka U waxaa la yiraa "madaxa."
Baaqa qof madaxa ah ee ku qoran warqada ansixinta, fiisaha, iyo kaarka I-94 waa **U-1**.
Baaqa qof madaxa ah ee warqadiisa shaqada ku qorani waa **(a)(19)**.
Qofka maxada ah dadka xubnaha qoyskiisa ah waxaa loogu yeeraa "ku tiirsanayaal."
Baaqa ku tiirsanayaasha ee warqada ansixinta, fiisaha, iyo kaarka I-94 waa **U-2, U-3, U-4 ama U-5**. Baaqa ku tiirsanayaasha warqadooda shaqada ku qorani waa **(a)(20).**

## Ma heli karaa Sooshal Sakuurati iyo Laysinka Darawalka?

Haa, waa aad heli kartaa kaarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security) iyo laysinka darawalka ama aqoonsiga (ID) ay goboladu bixiyaan.




**Sooshal Sakuuratiga (Social Security):** Iyadoo hadba ku xiran kolka codsigaaga la gudbiyey, waxaa dhici karta in toos la isaga kaa siiyo kaarka sooshal Sakuurati (social security). Laakiin waxay u badan tahay inaad u baahato inaad u dalbato lambar sooshal Sakuurati (social security) iyo kaar gooni. Marmarka qaarkood waxaa fudud inaad sugto inta aad ka helayso warqadda shaqada. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan arritan, kala tasho qareen.

**Laysinka ama Aqoonsiga (ID):** Sidda ay dhigayaan sharciyadda cusub ee laysinka darawalka uma baahnid lambar shooshal sakuurati (social security) ah si aad u hesho laysin darawal ama

aqoonsi (ID). Waa ay ka fududahay sidda kale inaad hesho kuwaa kolka aad sharci qaadato, laakiin waa aad heli kartaa laysin ama aqoonsi (ID) ka hor inta sharcigaaga fiisaha U (U visa) aan la ansaxin xataa ka hor inta aadan qaadan warqad shaqo. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Sidda Lagu Codsado Laysinkaaga Darawalka ee Minnesota (Laysinka Darwaladda ee Cid Walba la Siinayo)*.

## Ma shaqeyn karaa?

Dukumiintiga Ruqsada Shaqadu (EAD) waxa uu kuu ogolaadaa inaad ka shaqeyn karto Mareykanka (U.S.). Waxaa kaloo loogu yeeraa (EAD) warqad shaqo. Warqada shaqadu waxa ay sheegtaa waqtiga aad bilaabi karto inaad shaqeyso iyo waqtiga ruqsada shaqadu ay dhamaanayso.

- **Hadii aad tahay qofka madaxa ah aadna ku noolayd Mareykanka (U.S.) kolkii aad heshay martabada U ee muhaajirka** ma aha inaad u dirto codsi warqad ah hay'ada USCIS. Waa inaad iskaa u heshaa warqad shaqo oo shaqeynaysa 4-sanno.

- **Hadii aad tahay qofka madaxa ah aadna ka heshay fiisahaaga dibada Mareykanka (U.S.)** waa inaad hesho warqad shaqo. U dir warqad wata nuqulada dukumiintigaaga Rugta Adeega ee Hay'ada ISCIS ee Vermont (Vermont Service Center). Waxaa dhici karta inay sahlan tahay in la diro codsi warqad shaqo laakiin la is kama rabo.



- **Hadii aad tahay ku tiirsane** waa khasab inaad u dirsato codsi USCIS si aad warqad shaqo u hesho.
  - Hadii aad ku noolayd wadanka United States ka kolkii aad u dirsatay codsigaaga martabada U hay'ada USCIS, waa aad diri kari lahayd codsiga warqada shaqada isla kolkaa aad dirayso codsiga martabada U.
  - Hadii aad fiisahaaga U ka qaadatay wadanka dibadiisa ka diba aad soo gashay wadanka United States, waa aad u dirsan kartaa codsiga warqada shaqada hay'ada USCIS ka dib kolka aad timaado wadanka United States iyadoo ay weheliyaan nuqul kaarkaaga I-94 ah iyo dukumiintiyo kale.

## Ma heli karaa manfacyada dowlada hadda?

Gobolka Minnesota, hadii dakhligaagu uu yar yahay, waxaa dhici karta inaad ka hesho kaar caafimaad dowlada. Hadii aad 50 sanno jir tahay ama aad ka weyn tahay aadna dan yar tahay, waxaa dhici karta inaad hesho gargaar dhanka cuntada ah. Ka hubi xafiiska manfacyada dowladdu bixiso ee degmadaada arrintaa. Gobolada kale waxaa dhici karta inay leeyihiin mashruucyo iyo xeerar kale. Hadii laguu diido manfacyada, wac xafiiska gargaarka dhanka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga.

## Ma inaan is qoraa kaar caafimaad iminka?

Hadii aad lahayd kaar caafimaad oo shaqo ka hor inta aadan helin martabada U, taasi isma bedeli. Laakiin, hadii aadan lahayn kaar caafimaad oo shaqo, helida martabada U du waxaa dhici karta inay kaa caawiso inaad xaq u yeelato kaar caafimaad. Xaqiiqdii, **waa lagu ganaaxi karaa hadii aad xaq u leedahay kaar caafimaad laakiin aadan raadsan**. Gobolada kala duwani waxa ay leeyihiin mashruucyo iyo xeerar kala duwan.

Gobolka Minnesota, Muhaajirka martabada U da haystaa waxaa dhici karta inuu awoodo inuu helo kaarka caafimaadka ee dowlada ama kabid. Xaq u yeeladku waxa uu ku salaysan yahay dahliga qoyska iyo arrimo kale. Waad isqori kartaa kaarka caafimaadka ee la yiraa MNSure. Waxaa jira dad kaa caawin kara adiga arrintan oo la yiraa "Naakheedeyaal". Waxaa jira Naakhuudeyaal jooga rugo badan oo caafimaad, cisbitaalo iyo hay'adaba. Kala xiriir wixii akhbaar ah xafiiska gargaarka dhanka sharciga (legal aid) ee deegaankaaga.




## Dukumiintiyadee ayaa cadeeya inaad haysto martabada U ee muhaajira?

- **Hadii aad joogtay Mareykanka (U.S.) kolkii aad heshay martabadaada U ee muhaajirka:** Hay'ada USCIS waxa ay boostada kuu soo dhigtay warqada ansaxinta martabada U. Warqada qaybteeda hoose waxaa ku jira kaar I-94 ah. Warqadani waxa ay cadeynaysaa inaad tahay muhaajir haysta martabada U. Warqadaada shaqadu sidoo kale waxa ay cadeyn u tahay martabadaada U da.

- **Hadii fiisaha U da aad ka qaadatay wadanka Mareykanka (U.S.) dibadiisa, si kolkaa aad u awoodo inaad timaado (U.S.):**
  Shaabadaada ogolaanshaha, kaarkaaga I-94 iyo warqada shaqada ayaa ah cadeymaha kaliya ee sheegaya inaad haysato martabada U. Warqada ansaxinta ee hay'ada USCIS iyo fiisaha ku dhagan dal-ku-galkaaga (passport) waa muhiim, laakiin ma aha cadeymo sheegaya inaad haysato martabada U.

## Goorma ayey bilaabmi martabadayda U ee muhaajirku? Goorma ayeyse dhamaan?

Waa laguu ogol yahay inaad joogto United States inta aad haysato martabada U ee muhaajirka.

- **Hadii aad joogtay Mareykanka (U.S.) kolkii aad heshay martabadaada U ee muhaajirka:**
  - Warqada ansaxinta ee hay'ada USCIS waxaa kor kaga qornaan doona taariikhda ay martabadaada U bilaabantay iyo marka ay dhamaanayso.
  - Kaarka I-94 ka ee ku jira dabada warqada ansaxinta sidoo kale waxa uu leeyahay taariikhda bilowga iyo mida dhamaadka.

- Hadii aad haysato warqad shaqo, waxaa ay sheegi taariikhda ay martabada U dhamaanayso.

- Hadii aad tahay qofka madaxa ah, waa inaad haysataa martabada U ee muhaajirka 4-sanno.

- Hadii aad tahay ku tiirsane, waxa aad haysan kartaa martabada U ee muhaajirka 4-sanno, ama ka yar.

- **Hadii fiisaha U da aad ka qaadatay wadanka Mareykanka (U.S.) dibadiisa, si kolkaa aad u awoodo inaad timaado (U.S.):**
  - Shaabadaada ogolaanshaha, kaarkaaga I-94 waxa ay sheegaan taariikhda aad soo gashay Mareykanka (U.S.) adigoo ah muhaajir U. Tani waa taariikhda martabadaada U bilaabantay.

  - Taariikhda martabadaada U ay dhamaanayso waxa ay ku qoran tahay warqadaada ansaxinta ee aad ka heshay hay'ada USCIS, fiisaha U ee dal-ku-galkaaga (passport), shaabadaada ogolaanshaha, kaarkaaga I-94 ka iyo warqadaada shaqada. Hadii taariikhaha dhamaadka martabadu aysan isku wada mid ahayn dhamaan dukumiintiyadaa oo dhan, la tasho qareen sharciyada socdaalka qaabilsan.

  **Digniin:** Hadii martabadaada U da ay mudaddeedu ka yar tahay 3 sanno, la tasho qareen sharciyada socdaalka qaabilsan.

## Ma ka caawin karaa xubnaha qoyskaygu inay helaan fiise ama sharci?



- **Hadii aad tahay madaxa**: Haa, waa aad u isticmaali kartaa martabadaada U inaad ku caawiso in qaar ka mid ah xubnaha qoyskaagu ay helaan fiise ama sharci. Xubnaha qoyskaaga ahi waa ay ku noolaan karaan United States ka ama wadan kale. Marmarka qaarkood, dadkaa waxaa ku jiri kara qof mustaqbalka ku soo biira qoyska, sida hadii aad guursato ha dhow. La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka si aad wax uga ogaato arrintaa.

- **Hadii aad tahay ku tiirsane**: Maya, uma isticmaali kartid martabadaada U da inaad ku caawiso xubno qoyskaaga ka tirsan. Hadii mar ay noqotabada mar aad noqotid dagane rasmi ah, waxaa dhici karta inaad awoodo inaad caawiso qaar ka mid ah xubnaha qoyskaaga kolkaa. La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka si aad wax uga ogaato arrintaa.

## Ma ku soo noqon karaa wadanka the United States hadii aan dibada u safro?

- **Hadii aad joogtay Mareykanka (U.S.) kolkii aad heshay martabadaada U ee muhaajirka:** Hadii aad dibada uga baxdo Mareykanka (U.S.) waa inaad codsataa fiise U ah si aad dib ugu soo noqoto. Waxa aad ka codsan fiisaha U Safaarad ama Qunsiliyad Mareykanku (U.S.). uu dibada ku leeyahay. Waxaa dhici karta inaad waydiisato saamaxaad hay'ada USCIS, ka hor inta Safaarada ama Qunsiliyada Mareykanku (U.S.). aysan ku siin fiisada U. Kala tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka sida loo codsado fiise iyo saamaxaad.

  **Dhib badan ayaad kala kulmi kartaa inaad hesho fiise aad dib ugu soo noqoto Mareykanka (U.S.).** Taa macnaheedu waa hadii aad dibada u safarto, waxaa dhici karta inaad awoodi waydo inaad soo noqoto. Ama waxaa dhici karta in lagugu khasbo inaad dibada ka joogto Mareykanka (U.S.) muddo dheer. Arritani waxay kaa hor istaagi kartaa noqoshada degane rasmi ah. **Hadii ay suurta-gal tahay, joog gudaha Mareykanka (U.S.) ilaa inta aad ka noqonayso degane rasmi ah**. La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka <u>ka hor</u> inta aadsan qorsheysan inaad wadanka dibada uga baxdo.

- **Hadii fiisaha U da aad ka qaadatay Mareykanka (U.S.) dibadiisa, si kolkaa aad u timaado (U.S.):**
  Eeg fiisaha U da ee dal-ku-galkaaga (passport). Waxay u badan in marmar badan lagu soo geli karo wadanka. Hadii ay tahay fiise marmar badan lagu soo geli karo wadanka, waxa aad isticmaali kartaa fiisahaa si aad ugu soo noqoto Mareykanka (U.S.). Khasab kuguma aha inaad codsato fiise kale. Eeg taariikhda fiisahu uu dhacayo. Waa inaad soo noqotaa ka hor inta uusan dhicin.



**<u>Digniin</u>:** Mar kasta oo aad dibada uga baxdo Mareykanka (U.S.), mas'uuliyiinta laanta socdaalka ayaa go'aansada inay kuu ogolaan inaad dib ugu soo gasho wadanka iyo in kale. Waxa ay go'aansan karaan inay yiraahdaan maya kolka aad xaduudka ama garoonka diyaarada aad timaado, xataa hadii aad haysato fiise. La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka <u>ka hor</u> inta aadsan qorsheysan inaad wadanka dibada uga baxdo. Qareenku waxa uu kuu sheegi karaa khataraha ka imaan kara socdaalka ee quseeya kiiskaaga.

## Waqti intee le'eg ayaan dibada uga maqnaan karaa United States?

Safarada dhaadheer ee dibad uga maqnaanta Mareykanku (U.S) waxa ay carqaladeyn kartaan fursadaada aad ku noqon karto dagane rasmi ah.

**<u>Digniin:</u>**

- Ha qaadan hal safar oo ka badan 90-cisho.
- Ha qaadan safaro marka la isku wada daro waqtigoodu dhamaan uu ay ka badan 180-cisho.

## Siddee ayaan u codsan karaa martabada deganaha rasmiga ah?

Waxa aad codsan kartaa martabada deganaha rasmiga ah **ka dib 3-sanno** kolka aad ku noolaato Mareykanka (U.S.) adigoo haysta martadaba U ee muhaajirka.

<u>Ogow</u>: Kolka aad codsado sharci deganaansho rasmi ah, waxa aad codsan kartaa inaad hesho waraqada shaqada isla markaa iyadoo lagu salaynayo codsigaaga sharciga deganaanshaha ah. Kolkaa sidaa waxa aad ku heli kartaa warqad shaqo oo cusub inta hay'ada USCIS ay wado hawsha dhamaystirka codsiga sharciga deganaanasha rasmiga ah. Waa suurtagal inaad hesho warqadda shaqada ka hor inta warqada shaqada ee fiisaha U (U-visa) du aysan dhicin, laakiin waxaa laga yaabaa inaadan helin. Hase yeeshee, haddii laanta socdaalku (immigration) ay

hesho codsigaaga sharciga deganaanshaha rasmiga ah, ka hor inta sharciga fiisahaaga U ee aan deganaanshaha ahayni uusan dhicin, sharciga U ee aan daganaanshaha ahayn durbadiiba waa la kordhin waqtigiisa inta ay socoto hawsha codsiga deganaanshaha rasmiga ah. Rugsadaadda shaqadda sidoo kale iyana durbadiiba mudadeedda waa la kordhin.

<u>Xusuusnow</u>: Eeg kaarkaaga I-94 si aad u ogaato kolka ay martabadaadu bilaabantay. Hadii aad heshay fiisahaaga U da adigoo ku nool Mareykanka (U.S.), kaarkaaga I-94 hoos uga qorna warqadaada ansaxinta ee aad ka heshay hay'ada USCIS. Hadii aad ku timi Mareykanka (U.S.) fiisaha U, waxa aad u baahan tahay inaad ka daabacato kaarkaaga I-94 shabakada [www.cbp.gov/I94](http://www.cbp.gov/I94). Waxaad kaloo eegi kartaa shaabada ogolaanshaha ee dal-ku-galkaaga (passport) si aad u ogaato kolka martabadaada U du ay bilaabmantay.

Waa inaad cadeysaa inaad Mareykanka (U.S.) joogtay 3-sanno. Waxaad u baahan tahay inaad nuqul ka siiso hay'ada USCIS dhamaan boggaga dal-ku-galkaaga (passports). Waa muhiim inaad cusboonaysiiso dal-ku-galkaaga (passports) ka hor inta uusan dhicin. Hadii aad u ogolaato inuu dhaco dhib bay kuu keeni kartaa. Hadii aad hesho dal-ku-galka (passports) cusub, sawiro nuqulo ah ka samee dhamaan bogaga dal-ku-galkii (passports) hore. Hadii aad dibada uga socdaasho Mareykanka (U.S.), wado nuqulo ah dhamaan kaararkaagii hore ee I-94 iyana. Sidoo kale, xaree canshuurta sannad walba oo aad haysato sharciga U ee aan daganaashaha rasmiga ahayn, meelna dhigo nuqul ah canshuurta aad xareysay.

Wado iyana warqado kale oo cadeyanaya inaad Mareykanka (U.S.) ku noolayd mudo 3-sano ah. Kuwani waa qaar tusaale ah:

- rasiidka kirada
- diiwaanada tacliinta
- diiwaanada shaqada, gaar ahaana jeegta dabadooda
- Iyo wixii kale ee warqado ah ee cadeynaya in aad Mareykanka (U.S.) joogtay ee ay magacaaga iyo taariikhi ku qoran yihiin.



**<u>Digniin</u>:** Hadii aad haysato martabada U ee muhaajirka oo 3-sanno ka yar, la tasho qareen sharciyada laanta socdaalka qaabilsan markiiba.

## Waa maxay waqtiga kama dambeysta ah ee la codsan karo martabada deganaanta rasmiga ah?

Waa khasab inaad codsato sharci deganaansho rasmi ah ka hor inta uusan dhamaan waqtiga sharcigaaga U aan deganaanshaha ahayn. Laanta socdaalku (immigration) waa khasab inay hesho codsigaaga ka hor inta waqtiga sharcigaagu uusan dhamaan, kolka hubi inaad boostada ku dirto ka hor waqtiga dhamaadka.

Mar labaad, xusuusnow:


- **Hadii aad joogtay Mareykanka (U.S.) kolkii aad heshay martabadaada U ee muhaajirka,** eeg warqadaada ansaxinta ee aad ka heshay hay'ada USCIS ama warqadaada shaqada si aad u ogaato kolka ay martabadu dhamaanayso.

- **Hadii fiisaha U da aad ka qaadatay Mareykanka (U.S.) dibadiisa, si kolkaa aad u timaado (U.S.)** warqadaada ansaxinta ee aad ka heshay hay'ada USCIS, fiisaha U ee dal-ku-galkaaga (passport), shaabada ogolaanshaha soo gelida dalka, kaarkaaga I-94, warqadaada shaqada waxa ay sheegaan kuli kolka ay martabadaadu dhamaanayso. Hadii waqtiga dhamaadka ee dukumiintiyadaasu aysan isku mid wada mid ahayn, la tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka.

Hay'ada USCIS waxa ay marmarka qaarkood ku bixin kartaa waqti syaado ah martabada U ee muhaajirka. Laakiin taasi qaalib ma aha. Kaliya waxa ay dhacdaa marka ay xaalado gaar ah oo aad u cayimani ay jiraan. Hadii aad doonayso inaad dheerayso waqtiga martabadaada U, la tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka.

## Maxay tahay inaad ka ogaado noqoshada degane rasmi ah?

Hay'ada USCIS kaliya waxa ay ku siin adiga martabada deganaanshaha rasmiga ah hadii ogolaanshaha laguu ogolaanayo Mareykanku (U.S.) sabab looga dhigo naxariis iyo bini'aadanimo, si dadka ehelka ahi ay u wada joogaan, ama hadii sameynta taasi ay tahay maslaxada ummada. Waxyaabo badan ayaa waxyeeli kara fursadaada aad ku noqon karto degane rasmi ah.



Kuwani waa qaar tusaalayaal arrimhaa ah:

- Gaysiga dambiyo
- Isticmaalka, gadida, ama haysiga maandooriyeyaal sharci-darro ah
- Canshuur bixin la'aan
- Been u sheegid mas'uuliyiin dowlada ka tirsan
- Sheegashada inaad tahay muwaadin United States adigoon ahayn
- Si sharci-darro ah u codeyn
- Ka caawinta dad kale inay ku yimaadaan wadanka United States si sharci-darro ah.

Waa khasab inaad ka caawiso bilayska ama mas'uuliyiinta kale ee dowlada ee baaraya ama maxkamadeynaya dambiga sababta u ahaa siintaada martadabada U ee muhaajirka, aan ka ahayn in aysan macquul ahayn inaad taa sameysaa.

**Hadii aad tahay ku tiirsane:** Qaar ka mid ah isbedelada noloshadu la soo darsaa waxa ay kaa hor istaagi karaan inaad noqoto degane rasmi ah. La tasho qareen hadii aad ka fakarayso inaad isbedel muhiim ah oo noloshaada ah. Tusaale ahaan:


- Hadii aad isqabtaan qofka arrinta madaxa ka ah, is furida qofkaasi waxa ay kaa hor istaagi inaad noqoto degane rasmi ah.
- Hadii aad tahay ilmo uu dhalay qofka arrinta madaxa ka ahi, hadii aad guursato adigu taasi waxa ay kaa hor istaagi kartaa noqoshada degane rasmi ah.

## Ma inaan helaa caawimaad ah codsashada martabada deganaha rasmiga ah?

- Waa ra'yi wacan inaad hesho qareen sharciyada laanta socdaalka qaabilsan oo kaa caawiya codsiga martabada deganaha rasmiga ah. La tasho qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka ka hor codsiga deganaanta rasmiga ah.

## Ma inaan u sheegaa hay'ada USCIS hadii aan guuro?

Haa. Waxa aad u baahan tahay inaad u sheegto hay'ada USCIS mar walba oo aad guurto ama aad bedesho ciwaankaaga. Waxa aad haysataa 10-cisho oo aad ugu sheegto. Isticmaalka Foomka AR-11, Bedelida Ciwaanka (Form AR-11). Waxa aad ka ogaan kartaa wax badan oo arrintan ku saabsan hadii aad akhrido warqadayada xoga aruursan ee *U soo Sheegida Ciwaan Bedelida Laanta Socdaalka (Immigration)*. Waa aad joojin kartaa soo dirida Foomka AR-11 hadii aad noqoto muwaadin Mareykan (U.S.) ah.




***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan hadii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**